

Ka bixi ra'yi-celin isbeddellada la soo jeediyay ee ku saabsan ka- dhaafitaanka Baahiyaha Aan Caadiga ahayn ee Carruurta

Kani ku akhri: [English](#) | [Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [Русский](#) | [简体中文](#) | [Soomaali](#) | [العربية اللغة](#)

Taariikhda: 23-ka Oktoobar, 2026

Ku socoto: Xubnaha Bulshada Qabta Naafanimada Garaadka iyo
Korriinka (I/DD)

Ka socoto: Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS)

Salaan,

Wargelintan waxaa loogu talagalay bulshada oo dhan. Waa waxa ugu
muhiimsan ee loogu tala galay:

- Waalidiinta carruurta qabta baahiyaha aan caadiga ahayn

- Shaqaalaha barnaamijyada naafanimada korriinka ee bulshada (CDDPs) iyo Adeegyada Guriga ee Xooggan ee Carruurta

Waa maxay waxyaabaha cusub?

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS, Office of Developmental Disabilities Services) ayaa cusbooneysiinaya laba ka mid ah ka-dhaafitaanadooda Medicaid. Waxaan kaa codsanaynaa ra'yiga aad ka qabto isbeddellada aan soo jeedinay.

Ka-dhaafitaanada iyo isbeddelada waxaa ka mid ah:

- **1915 (c) Ka-dhaafitaanka Baahiyaha Qayrucaadiga ah ee Carruurta (CEN):** Cusbooneysiintu waxay kordhinaysaa tirada carruurta ee ka-dhaafitaanku u adeego laga bilaabo 155 ilaa 230. [Barnaamijka CEN](#) waxa loogu talagalay carruurta ka yar 18 jir kuwaasi oo qaba baahiyo caafimaad ama habdhaqan oo aad u sarreeya. Waalidiinta iyo masuuliyiinta ayaa lacag lagu siiyaa inay daryeel siiyaan ilmahooda.
- **1915 (b) (4) Ka-dhaafitaanka Qandaraaska Xulashada ah ee Kharash-ku-beddelo-Adeeg:** Cusboonaysiintani waxay kordhinaysaa saadaasha kharashka maaraynta kiisaska CEN.

Hoos waxaa ku qoran macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo khuseeya isbeddellada. Fadlan akhri. Haddii aad u baahan tahay turjumaad, gujo-raacyo ayaan soo raacinay qaybta sare ee fariintan.

Uma baahnid inaad akhrido ka-dhaafitaanada oo dhan si aad jawaab-celin u bixiso. Akhrinta macluumaadka kooban ayaa kugu filan. Haddii aad doorbideyso, waxaad ka [akhrisan kartaa ka-dhaafitaannada](#)

[dhammaystiran ee ay ku jiraan isbeddelada la soo jeediyay onlaynka iyagoo af Ingiriisi ku qoran.](#)

Macluumaadka kooban ee isbeddelada la soo jeediyay

1915 (c) Ka-dhaafitaanka Baahiyaha Qayrucaadiga ah ee Carruurta (CEN)

Asal ahaan, ka-dhaafitaankani wuxuu u adeegi karaa 155 carruur markiiba. Waxaan kordhinaynaa tirada carruurta ku jiri karta barnaamijka CEN kana dhigaynaa 230 carruur ah markiiba. Tani waxay naga caawinaysaa inaan qorsheyno carruurta soo galaysa iyo kuwa ka baxaya barnaamijka sannad gudahiisa.

Waxaan sidoo kale kordhinaynaa tirada guud ee carruurta ku jiri karta barnaamijka CEN muddo hal sano ah laga bilaabo 171 ilaa 280.

Waxaan weydiisaneynaa Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) inay isbeddelkani u ansixiyaan si dib-ugu-laabasho ah ilaa 1-da Luulyo, 2026.

Sababtee ayuu isbaddalkani u dhacayaa?

Barnaamijku wuxuu bilaabmay 1-da Luulyo, 2024. Sharci-dejinta Oregon ayaa siisay barnaamijka miisaaniyad xaddidan. Xilligaasi, waxaanu qiyaasnay in barnaamijku uu taageeri karo 155 ilmo markiiba.

Qiyaastii 15 bilood kadib markii barnaamijku bilawday, waxaanu haynay xog ku filan lafaguridda isticmaalka adeegga barnaamijka. Celceliska kharashka ilmihiiba waa ka hooseeyey intii la filayey. Ilaa markaas, xogtu wali waxay

taageeraysay natiijadan. Taasi waa sababta aanu u ballaarin karno barnaamijka si uu ugu adeego carruur badan iyadoo aan miisaaniyadda waxba lagu darin. Dowladda federaalku uma aragto isbeddel weyn, sidaas darteed waxaan codsan karnaa taariikh bilow oo dib-ugu-laabasho ah ilaa [1-da Luulyo, 2026, waana markii aan ballaarinay diiwaangelinta barnaamijka.](#)

1915 (b) (4) Ka-dhaafitaanka Qandaraaska Xulashada ah ee Kharash-ku-beddelo-Adeeg

Ka-dhaafitaankan, waxaan ku cusbooneysiinaynaa saadaasha kharashka maaraynta kiisaska ee barnaamijka CEN. Ka-dhaafitaankan ayaa sidoo kale noo saamxaya inaan qeexno tirada iyo nooca hay'adaha maaraynta kiisaska ee loo oggolyahay inay bixiyaan adeegyada maaraynta kiisaska ka-dhaafitaanka.

Sababtee ayuu isbaddalkani u dhacayaa?

Waxaan u baahanahay inaan cusbooneysiino saadaasha kharashka ee maaraynta kiisaska si ay ugu beegmaan kororka tirada carruurta ee uu ka-dhaafitaanka CEN uu u adeego. Waxaan codsaneynaa taariikh oggolaansho oo dib-ugu-laabasho ah oo ah 1-da Luulyo, 2026.

Sideen u soo gudbin karaa faallooyinkayga?

1. Iimayl u dir odds.waivers@odhsoha.oregon.gov.
2. Ugu dir boostada faallooyin qoraal ah ODDS Medicaid waiver/State Plan analyst, 500 Summer Street NE E-09, Salem, OR 97301.

Waa maxay wakhtiga kamadambaysta ah?

Fadlan soo gudbi ra'yi-celintaada kahor 25-ka Noofambar, 2026.

Faallooyinka boostada lagu diro waa inaan helno ugu dambeyn taariikhdan.

Maxaad ku samayn doontaa ra'yi-celinteena?

Waan akhrin doonaa ra'yi-celinta oo dhan oo waxaan ka fiirsan doonaa inaan u baahannahay in aan cusbooneysiinno isbeddellada qabyo-qoraalka ah. Waxaan isbeddelada la soo jeediyay u gudbin doonaa CMS si loo ansixiyo.

Waxaan soo gelin doonaa [ra'yi-celintaada oo kooban mareegtayada](#) ugu dambayn 1-da Janaayo, 2027. Soo-koobiddan waxaa ku jiri doonta jawaabtayada ku aaddan ra'yi-celintaada iyo inaan qaadanaa ra'yi-celintaada. Waxaan sidoo kale soo gelin doonaa ka-dhaafitaannada kama dambaysta ah ee la diyaariyey.

Sideen su'aalo u soo gudbin karaa ama wax badan u ogaan karaa?

- [Wax badan ka ogow geedi-socodka adoo booqanaya mareegtayada.](#)
- Iimeyl ku dir su'aalahaaga odds.waivers@odhsoha.oregon.gov.
- Farriintani waxaa la soo geliyay bogga maxalliga ee [bulshada ee barnamajiyada naafanimada korriinka](#) iyo [bogga dilaaliinta adeegyada taageerada](#). Waxaad sidoo kale codsan kartaa nuqullo daabacan.

Mahadsanid,

Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon

Waxaad dukumintigaan ku heli kartaa si bilaash ah isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad ku dooneyso. Iimayl ku soo dir dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.

Khayraadka/Dhigaallada

- Isku diiwaangeli [wargelinnada ODDS](#).
- Wax ka ogow [dhacdooyinka ODDS](#).
- Isku diiwaangeli [wargelinada Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon](#).
- Akhri [farriimo ka socdo ODDS](#).
- Naga soo raac [Facebook @oregondhs.idd](#)